HENNEPIN COUNTY
MINNESOTA

# Ilaha La Ansixiyay ee Badeecooyinka Cuntada

TALAABADA KOOBAAD EE XAQIIJINTA BADQABKA CUNTADA EE MACAAMIISHA

## Shuruudaha guud

Ka iibso cuntada cunto bixiyaasha ganacsiga ee ku jira maamulka sharciga. Ilaha aqoonsiga haysta waxaa ku jiri kara:

- Beeraleeyda maxaliga ah, kuwa gobalka ama kuwa caalamiga ah
- Warshadaha cuntada sameeya
- Cunto bxiyaasha ama qeybiyaasha

Waa masuuliyad saaran qofka shaqada masuulka ka ah (PIC) inuu xaqiijiyo inaan cuntada lagu diyaarin ama lagu kaydin guri gaar loo leeyahay.

Goobaha cuntada ayaa ka iibsan karta ama cuntada toos uga qaadan karta beeraleeyda. Beeraleeyda ayaa cunto ku beeri kara dhulkiisa si uu u iibsho bilaa ruqsad, ama wuxuu soo iibsan karaa cuntada kadibna dib ayuu u iibin karaa asagoo ruqsad cunto haysta. Haddii uu ruqsad leeyahay iyo haddii kalaba, beeraleeydu waa inay xaqiijiyaan in dhammaan cuntada ay iibshaan ama ku deeqaan ay waafaqsan tahay sharciyada quseeya.

## Shuruudaha gaar ah

Cuntooyinka qaarkood waa inay buuxshaan shuruudo gaar ah. Kuwaan waxaa kamid ah:

- Caanaha dareeraha ah iyo maadooyinka caanuhu waa inay noqdaan kuwo ka yimid ilo waafaqsan heerarka Drajada A, oo ay ku jirto sifaynta caanaha.
- Kaluunka waa in qaab ganacsi ama sharci lagusoo dabaa ayna aqbalaan maamulka sharciga ah iibintiisa ama adeegga.
- Hilibka iyo hilibka shimbiraha waa inay kormeer iyo ansixin ka helaan USDA ama Waaxda Beeraha.
- Xayawaannada ugaarsiga ee lagu korsado Minnesota waa inay kormeer iyo ansixin ka helaan USDA ama Waaxda Beeraha.
- Ukunta qolofka ku jirta waa in la helaa ayadoo nadiif ah oon dilaacin ayna buuxisaa heerarka darajada B ama ka heer ka sareeya.
- Ukunta dareeraha ah, ukunta la qaboojiyay, ukunta qalalan, ama maadooyinka kale ee ukuntu waa inay mar hore maraan sifayn marka la helaayo.
- Cuntada la qasacadeeyay, baakada la gashay, ama cuntada la baceeyay waa in laga soo iibsadaa warshada cuntada oo ruqsad leh.
- Molluscan shellfish waa in laga keenaa meel ku qoran Liiska Shirkadaha Ruqsada u haysa inay kalluun qolfeedka ukala Dhoofiyaan Gobalada (Interstate Certified Shellfish Shippers List).
- Boqoshaaga la cuni karo waa in lagasoo qaato beeraleey maray koorsada aqoonsiga oo la ogolaaday oo ku aadan boqoshaagaas gaarka ah.

## Dhaqamada ugu fiican

### Aqoonsiga ilaha cuntada la ansixiyay

- Si ficaan u akhri qorshaha badqabka ilaha cuntada.
- Kormeer ku samee gaariga cuntada qaadaaya.
- Kormeer ku samee badqabka iyo tayada maadooyinka cuntada ee la keenay.
- Codso risiidka iibka oo meel fiican dhigo.

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Approved sources for food products_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health

Hennepin

## Diiwaan-haynta

Risiidyada waa inay ku jirtaa xogta soo socota:

- Taariikhda cuntada la keenay
- Magaca qofka gudoomay
- Lagu deeqay ama la iibsaday
- Qeexitaanka iyo cadadka cuntada
- Magaca cunto bixiyaha, ciwaanka iyo xogta lagala xariirayao (taleefanka ama ciwaanka iimeelka)

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Approved sources for food products_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health